

Hagaha Taageerada Xirfadaha Tiknoolajiyada

Ereybixinta iyo Kheyraadka loogu talagalay isticmaaleyaasha cusub ee Provider Hub iyo dadka taageeraya.

Hagahan wuxuu soo bandhigayaa toban tallaabo oo ku saabsan u diyaargarowga tiknoolajiyada Provider Hub. Haddii aadan hubin mid ka mid ah sagaalka tallaabo ee ugu horreeya, ilaha tallaabada 10-aad ayaa kuugu xiri kara maalgelin, waxbarasho, ama taageero kale.

1. Ku Xiridda Internetka
2. Xakameynta Qalabka
3. Istimaaalka limaylka
4. Internetka (INTERNET BROWSERS)
5. Buuxinta Foomamka
6. Soo Degsashada Faylasha
7. Kaydinta Faylasha
8. Abuurista iyo Tafatirka Faylasha
9. Ku Shubidda Faylasha
10. Helidda ilaha

TALLAABADA 1: KU XIRIDDA INTERNETKA


Si aad u isticmaasho internetka, waxaad u baahan tahay laba shay oo aad leedahay ama aad amaahato:



1. Qalab

Tusaalo ahaan:

- ④ Laptop
- ④ Tablet
- ④ Telefoonka gacanta (Smartphone)



2. ku xiranka Internet


Tusaalo ahaan:

- ④ Internetka Telefoonka Gacanta
- ④ Internetka Guryaha
- ④ Intyernetka maqaayadaha

Isku day isqiimeynta isdhexgalka leh ee ku yaal boggan: <https://mn.gov/dhs/provider-hub/>

TALLAABADA 2: XAKAMEYNTA QALABKA

Markaad isticmaaleyso qalab, waxaad u baahan tahay **xakameyn qalabka** si aad ugu sheegto waxa uu qabanayo.



Isticmaal **Mouse** si aad ugu tilmaanto waxyaabaha ku jira shaashadda oo guji si aad u xulato.



Isticmaal keyboard-ka si aad u qorto xarfaha iyo tirooyinka, ama si aad u xulato waxyaabaha ku jira shaashadda haddii aadan isticmaali karin mouse .




Isticmaal fartaada si aad ugu shaqeyso **taabashada shaashadda** ee tablet-ka ama taleefanka casriga ah.

TALLAABADA 3: ISTICMAALKA IIMAYLKA

Iimaylka waxaa loo isticmaalaa in lagu diro fariimo internetka. Sidoo kale waxaa loo adeegsadaa **aqoonsi gaar** ah oo lagu galo akoonnada khadka tooska ah.



Cinwaanka iimaylka wuxuu mar walba ka kooban yahay calaamadda: @



Website-yadu badanaa waxay weydiiyaan cinwaankaaga iimaylka iyo eray sir ah si ay u hubiyaan inay kuu soo bandhigayaan macluumaadkaaga, ee aanay ahayn mid qof kale.

TALLAABADA 4: INTERNETKA (INTERNET BROWSERS)

Browser waa barnaamij aad u isticmaasho akhrinta internetka. Waxaa jira noocyo badan oo browser ah, laakiin dhammaantood waxay u shaqeeyaan si isku mid ah.



Microsoft Edge



Mozilla Firefox




Apple Safari



Google Chrome

Dhammaan browser-yadu waxay leeyihiin qalabkan:


- ④ Goob **cinwaan (Address bar)**: Halkaas oo aad ku gelin karto cinwaanka website-ka.
- ④ **Tabs**: Si aad dhowr bog isla mar ah ugu furato.
- ④ Hab lagu keydiyo website-yada aad jeceshahay (Bookmarks): Si aad si fudud ugu booqato markasta.
- ④ Badhanka rogista (Scroll bars): Si aad u akhrido qaybaha bogga ee aan shaashadda ku muuqan.




Isku day isqiimeynta isdhexgalka leh ee ku yaal boggan <https://mn.gov/dhs/provider-hub/>

TALLAABADA 5: BUUXINTA FOOMAMKA

Website-yadu waxay isticmaalaan foomam (**forms**) si ay u ururiyaan macluumaad. Qayb kasta oo macluumaad ah waxay gashaa meel gooni ah oo loogu talagalay (**field**). Waxaa jira noocyo kala duwan oo meelaha foomamka ah.



Badhamada Radio waa goobo yaryar oo kuu ogolaanaya inaad hal jawaab oo kaliya ka dooratid badhamada kooxha Radio-ga.



Sanduuqyada hubinta (**Checkboxes**) waa afar gees. Waxaad dooran kartaa in ka badan hal jawaab oo ku jirta sanduuqyada hubinta.



Liisaska hoos u dhaca (**Dropdown menus**) waa bar leh fallaar dhinaca midig. Doorashada fallaaraha waxay soo muujinayaan dhammaan xulashooyinka jira.

Goobaha qoraalka (**Text fields**) waxaad ku qori kartaa wax kasta. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inay leeyihiin xeerar ku saabsan waxa ay aqbali karaan.

*Date of Birth

Enter a valid value. Please use the format MM-DD-YYYY.

*Email

Invalid email format.

Meelaha qaar waxaa lagu magacaabaa kuwo firfircoon (**dynamic**) — way qarsoon yihiin ilaa jawaabtaada su'aal kale ay muujiso inaad u baahan tahay.

Gudaha Provider Hub, meelaha **loo baahan** yahay waxaa lagu calaamadeeyaa xiddig cas: *

* **Type of applicant**

☐ Individual(s) ☐ Organization ☐ Government Entity

*Phone Number Alternate Number

TALLAABADA 6: SOO DEGSASHADA FAYLASHA

Soo dejin macnaheedu waa in aad felalsha internetka ka qaadato oo aad ku keydiso qalabkaaga.


 Download PDF

TALLAABADA 7: KAYDINTA FAYLASHA

Waad beddeli kartaa magaca faylkaaga iyo meesha lagu kaydiyo. Nooca faylka (file type) wuxuu kuu sheegayaa nooca faylka uu yahay iyo barnaamijyada aad u isticmaali karto si aad u furto.

Meelaha kaydinta caanka ah waa kuwaan:


- ④ Galka faylasha la soo dejiyay
- ④ Galka dokumentiyada
- ④ Desktop (kumbuyuutarka) ama shaashadda (taleefankaaga).



Waxaad sidoo kale faylasha ku kaydin kartaa faylal gaar ah oo ku jira internetka, adigoo adeegsanaya xulashooyinka kaydinta daruuraha sida OneDrive ama Google Drive.


Nooca faylka waxaad ku arki kartaa mid ka mid ah saddexdan qaab:

- ④ Icon
- ④ File extension
- ④ File type details



Isku day isqiimeynta isdhexgalka leh ee ku yaal boggan <https://mn.gov/dhs/provider-hub/>

TALLAABADA 7: (SII SOCOTA): KAYDINTA FAYLASHA



Waxaa jira siyaabo badan oo loo beddelo magaca faylka iyo meesha lagu kaydiyo. Habka labadabaaba hal mar loogu beddelo waa "Save As." Save As wuxuu ku jiraa menu-ga File ee barnaamijyo badan.

TALLAABADA 8: ABUURISTA IYO TAFATIRKA FAYLASHA

Waxaa jira siyaabo badan oo loo abuuri karo faylasha aad ugu baahan tahay Provider Hub.



Qor **dukumeenti** adoo adeegsanaya Word, Google Docs, ama Notepad.



Sawir ka qaado adoo isticmaalaya kamaradaada, sawirka shaashadaa (screenshot), ama app sawiriya (scanner app).



Keydi ama daabac fayl **PDF** ahaan

TALLAABADA 9: KU SHUBIDDA FAYLASHA

Ku shubin **Upload** macnaheedu waa inaad fayl ka qaadato qalabkaaga oo aad ku kaydiso internetka.



Upload Files

TALLAABADA 10: HELIDDA ILAHA

Ilahaani waxay ku caawin karaan inaad hesho deeq si aad u iibsato kombuyuutar, internet qiimo jaban ee gurigaaga, fasallo laga barto xirfadaha kombuyuutarka oo kuu dhow, website-yada aad si gaar ah wax uga baran karto ama ku tababaran karto, iyo dad aad ka heli karto caawimaad intaan oo dhan ah.

Maalgelin iyo Qiimo Dhimis

DEEQO TEKNOLOJI AH OO KU SAABSAN GANACSIGA DARYEELKA CARRUURTA.


<https://www.firstchildrensfinance.org/for-businesses/grants/>

DEEQO BILAABID AH OO LAGA HELAYO CHILD CARE AWARE

<https://www.childcareawaremn.org/providers/grants-and-scholarships/> child-care-services-grants/

XIRIIR IYO QALAB LAGU HESHOA HELI KARO MEEL KUU DHOW

<https://www.everyoneon.org/find-offers>



1. Geli Zip-koodkaaga
2. Xulo Aqoontaada

Waxaa sidoo kale jiri kara dukaamo ku yaal deegaankaaga ama online-ka oo qof kastaa ka iibsan karo kombuyuutarro dib loo cusbooneysiisay (horey loo isticmaalay).

Siyaabaha Waxbarashada iyo Tababarka

RAADI FASAL BILAASH AH OO KUU DHOW

1-800-222-1990 or <https://hotline.mnabe.org/>

1. Geli goobtaada
2. Xulo Kombiyuutar hoosta mawduucyada fasalka
3. Xulo Raadinta (Search)
4. Xulo ikhtiyaar kasta oo ku jira liiska si aad u aragto faahfaahinta



ISKA DIIWAANGELI KOORSOOYINKA ONLINE -KA AH OO HUMAN-IT

<https://www.human-i-t.org/digital-training/>

ADIGA ISBAR

Waa kuwan qaar ka mid ah ilayaasha jira:

- ④ Ilaha GCFGlobal <https://edu.gcfglobal.org/en/subjects/tech/>
- ④ Liiska Northstar <https://www.digitalliteracyassessment.org/external-resources>
- ④ Fiidiyowga YouTube (Waxaad baari kartaa kuwo kale oo dheeraad ah!)
<http://youtu.be/y2kg3MOk1sY>

Dad aad Weydiisan Karto Caawimaad Dheeraad ah

MAKTABADDA DADWEYNAHA EE KUUGU DHOW

Maktabadaha dadweynaha waxay bixiyaan kombiyuutarro aad isticmaali karto, Wi-Fi bilaash ah, adeegyo daabacaad iyo koobiyeyn ah, taageero ganacsi yar yar iyo tiknoolajiyad, ama fasallo. Haddii maktabadda deegaankaaga aysan bixin adeegyadan, waxay ogaan doonaan halka laga heli karo!



HAGAYAASHA WAYFINDER NAVIGATORS

<https://hub.childcarewayfinder.org/s/contact-us> or 1-888-986-8207

HAY'ADAHA LAMAANE EE CHILD CARE AWARE

<https://www.childcareawaremn.org/contact-us/> or 1-888-291-9811